Jilayaasha aan Dawliga aheyn ee Koonfurta iyo Bartamaha Soomaaliya

Kalfadhiga 2aad ee Guddiga Agaasinka

3 - 5 June 2013

ARAR:

Kalfadhiga 2aad ee Guddiga Agaasinka Dalladda waxaa ka soo qeybgalay 16 xubnood oo ka tirsan Guddiga Agaasinka oo ka kooban 17, waana markii ugu horreysey oo tiro intaas la eg oo ka tirsan guddiga Agaasinka ay ka soo qeybgalaan kalfadhiga dalladda, taasna waxa ugu wacan nabadgelyada dalka oo soo hagaagtay. Kalfadhigu wuxuu ku dhacay jawi deggan oo aad u qurux badan, si saraaxad lehna looga dooday dhammaan ajenddeyaasha kalfadhiga, iyadoo dhanka kale la isla meel dhigay qorshe howleed ku aadan afarta bilood ee soo socota.

Habsami u socodka Kalfadhiga waxaa sidii caadadu ahayd gacan weyn ka geystay Xoghaynta Dalladda iyo maamulka huteelka Ramadaan ee lagu dhigay kalfadhiga.

<u>Ajendaha Kalfadhiga:</u>

1. Soo jeedin macluumaad la xiriira Taariikhda, ujeeddooyinka iyo Waxqabadka SNA-yada, gaar ahaan SOSCENSA.
2. Warbixinta Waxqabadka Dalladda 4tii bilood ee la soo dhaafay.
3. Xoojinta Xiriirka Daladda iyo Xubnaheeda iyo qodobbo la xiriira.
4. Warbixinta Maaliyadda Dalladda.
5. Warbixinta Wakiillada 11ka Gobol ee Koonfurta iyo Bartamaha Soomaaliya.
6. Dejinta Qorshe hawleedka (Action Plan) afarta bilood ee soo socota, salna ay u yihiin 7dii qodob ee Go'aanka GA kusoo baxay.
7. Wixii kale ee loo arko muhiim (AOB deemed important)

<u>Maalinta KOOWAAD: (03/06/2013).</u>

Kalfadhiga 2aad ee Guddiga Agaasinka SOSCENSA waxaa lagu qabtay Hotel Ramaada oo ku yaalla agagaarka Xarunta Wasaaradda Arrimaha Dibadda ee Muqdisho, waxaana Aayadaha Qur'aanka Kariimka ah iyo wacdi kooban oo uu soo jeediyey Sheekh Cumar Xerow, kaddib waxaa Guddoomiyaha dalladda SOSCENSA Mudane Cabdullahi Maxamed Shirwac si rasmi ah ugu dhawaaqey inuu furan yahay kalfadhiga, 8:35 subaxnimo, taariikhdu ahayd 3da June 2013. Maalintii 1aad, waxaa ka maqnaa laba xubnood oo kala ah: Cabdikariim Aweys Abow - oo ku maqnaa xanuun dartiis iyo Cabdullaahi Xasan Diiriye oo keenay cudurdaar.

Waxaana isla markiiba lagu bilaabay ka baaraandegga Ajendaha Kalfadhiga iyo jadwelka oo hore loogu soo diyaariyey, sidiisa ayaana loo aqbalay,(ajendaha - ka eeg lifaaqa) marka laga reebo qodob lagu kordhiyey oo ah "Federalism-ka" iyo qodobbo yar oo dhanka siiqadda wax laga beddelay, erayo yar-yar oo la yiri way ka maqan yihiin, sida "Xiriirka ka dhexeeya SOSCENSA iyo hay'adaha ay saaxiibka la tahay iyo xiriirka dawladda iyo dalladda, taasna waxaa ka qanciyey xubnihii soo jeediyey guddoomiyaha, oo sheegay inay arrimahaasoo dhan waxay ku jiraan warbixinta waxqabadka, sidoo kale waxaa su'aal faahfaahin ah laga weydiiyey erayga "MEERTO".

Ajendeha waxaa la ansixiyey 9:30 - 10:00, halka se yeeshee waxaa la beekhaamiyey 30 daqiiqo, sidaa darteed, wuxuu Guddoomiyaha soo jeediyey in Qodobkaas la geliyo waxa soo kordhay (any other business) waana lagu raacay .

Ajendaha 1aad:

Xubnaha Guddiga Agaasinka waxay u badan yihiin xubno cusub oo u baahan in lala socodsiiyo"Taariikhda, ujeeddooyinka, higsadka SOSCENSA guud ahaan iyo gaar ahaan waajibaadka xubnaha BODka".

Mowduucan waxaa soo jeediyey Maxamed Xuseen Eenow, oo ka tirsan Saferworld, aqoon dheerna u leh taariikhda iyo heeraka ay soo mareen hawlaha NSA-yada. Wuxuu Mudane Eenow ku bilaabay cinwaan uu u bixiyey soo jeedintiisa **"Maxaa loola jeedaa NSA"** wuxuuna u kala saaray:

a) Xilligii dhismaha dalladaha:

- Heshiiskii Contonuo ee dhex maray Eu-da iyo wadammadda ACP, lana saxiixay sannadkii 2000

- Iskaashiga seddex geesoodka (Tripartite) ee Dawladaha, Ururrada Bulshada Rayidka iyo EU-da.

Somaaliya iyo Jilayaasha aan Dawliga ahayn

- Kaddib markii INXA ay u ololeysey, waxaa la bilaabay 2005, kaddibna waxaa hore u sii qaadey CRD iyo Inter-peace.

- INXA waxay ahayd wakiilkii ugu horreeyey (Focal Point) kaasoo ku shiray Hargeysa loogana hadlayey arrinta NSA-yada la tashi lala sameeyey

-Waxaa dhismay guddigii la-talinta (Advisory Committee) oo uu ka mid ahaa Mudane Shirwac - .a Guddoomiyaha SOSCENSA ee xilligan.

-Waxaa kaloo la dhisay guddigii hawl-socodsiinta (Working Committee)

-Waxaa la qoray distuurkii qabyada ahaa ee dalladaha aan dawliga aheyn.

-Shirweynihii ugu horreeyey oo lagu qabtay Kampala - 2008.

b) Xilligii Madaxbannaaneynta dalladda SOSCENSA:

- Xilligan waxay ku beegnayd lixdii bilood ee ugu horreyeysay 2008dii, waxaana gacanta ku hayey maamulka dalladda SOSCENSA CRD iyo Saferworld.

- Kaddib 6 billood, SOSCENSA waxay noqotay xor waxayna shaqeysay 2008 - 2011, iyadoo toos ula hawlgashay Saferworld.

-Waxaa la diyaariyey hadafkii iyo qorshihii SOSCENSA, kaddibna waxaa la galay tababaro dhinaca maaliyadda iyo maamulka.

- Ujeeddada ugu weyn ee NSA-yadu waa inay saameyn (influency) ku yeeshaan arrimaha:

Wada-xaajoodyada:

- ✓ Siyaasadeed;
- ✓ Nabadgelyo;
- ✓ Iyo Horumarinta dalka.

- Hawlahaas oo dhan waxay NSA-yadu fulinayaan iyagoo metalaya shacbiga, una fududeynaya bulshada in codkooda la maqlo afkaartoodana la gaarsiiyo maxallada dalka looga taliyo ama go'aanka looga gaarayo siyaasadda gudaha ama dibadda.

C) Xilligan la joogo hawlaha SOSCENSA iyo Saferworld isla wadaan:

- Waxay isla dejiyeen istiraatiijiyad shaqo.
- Waxaa la bixinayaa tababaro la siinayo xubnaha SOSCENSA, gaar ahaan BODka iyo Xogheynta, kuwaasoo hore loogu marinayo hawlahooda iyo waajib gudashadooda.
- Waxay isla diyaarinayaan qorshe-hawleedyo waqtiyeysan
- Socodsiinta qorshe-yasha Uqareemidda ay dalladdu fulinayso.

d) Waajibaadka Xubnaha BODka SOSCENSA waxaa ka mid ah;

- Dejinta Siyaasaddan Dalladda, taasoo aan ka marneyn hadaf fog (Vision) .
- Habka loo marayo gaarsiinta codka bulshada dawladda iyo beesha caalamka (mission).
-Isku fillaansho dhinacyo badan (sustainablity with) sida:
  - Shaqaalaha
  - Dhaqaalaha
  - Shaqada
  - Sumcadda gudaha iyo dibadda.

Intaas, kaddib, waxaa su'aalo badan la weydiiyey Mudane Eenow oo ku saabsan soo jeedintiisii qiimaha badnayd.

Su'aal:- Sidee hawlahaas faraha badan ku soconayaan haddii ay SW Concept Note- ku xirayso mar kasta bixinta lacagaha waydiiyo si mashruuca ama hawsha loogu fuliyo?

Jawaab:-Concept Note, ma' ahan xujo laakiin, waa halla ogaado waxa aad maskaxda ku hayso ama ujeeddada aad ka leedahay fulinta hawsha aad rabto inaad qabato.

Su'aal:- Habka ay u qoran yihiin warbixinnada SOSCENSA, waxaad mooddaa inay wax ka dhiman yihiin, adiga Enow ahaan, maxaad is leedahay way khaldan yihiin?

Jawaab:- Waa run, hab qoraalkooda waxbaa ka dhiman, laakiin hadda Saferworld waxay soo waddaa hab cusub oo loo qoro warbixinnada (Reports), wax badan ayaana iska beddeli doono dhowaan, tababarro lagu soo xoojinayo awoodda shaqaalaha NSAyada waa ku jiraan qorshaha.

Ajendaha 2aad:

Markii guddoomiye xigeenka, Liibaan uu akhriyey warbixinta waxqabadka SOSCENSA ayaa xubnaha qaarkood soo jeediyeen su'aalo.

Su'aal- Waxaa warbixinta ka maqan, arrimo badan oo micno weyn leh oo bulshadu leedahay, oo ay ka mid yihiin:-

- Mooshinkii Baarlamaanka.
- Arrinta Kismaayo
- Qaraxyadii ka dhacay Muqdisho

Haddaba, maxay ku dhacday in SOSCENSA faraha ka laabato dhacdooyinkaas, oo shirarka isugu imaan waayaan BODka waxna uga dhihi waayaan?

Jawaab: "Horta dhacdooyinka waxaa ugu weynaa Mooshinkii Baarlamaanka, kaasna waa run waan ka gaabsannay SOSCENSA ahaan, markii ay la boodeen Ururrada Bulshada qaar ka tirsan oo eedeyn dusha kaga tuuray xubnihii Baarlamaanka ee waday Mooshinka, taasoo noo la muuqatay abbaare aan ku habboonneyn. Waxaa kaloo aan ugu ka gaabsannay inaan ka hor-niman ama khilaaf na dhex maro ururrada bulshada rayidka".

- "Middeeda kale, saxaafadda oo arrin looga hadlo wax micno ah ma samaynayso, waayo ficil ayaa wax beddeli karo, waxaana loo baahan yahay in lala hadlo xildhibaanada mooshika wada , si joogto ahna loo dabagalo ilaa laga miradhaliyo".

Su'aal:- Shirar badan ayaa xubnaha BODku isugu iman jireen 6 ilaa 8 jeer, labadii kalfadhiba, hadda maba dhicin wax shir ah mkidkan maaahane, sidoo kale ma dhici jirin in xogheynta oo kaliya ka qeybgasho shirarka looga hadlayo arrimo badan oo dalka khuseeya iyagoo metalaya SOSCENSA? Sidaa darteed, waxaan ku talinayaa in nidaamkii hore la soo celiyo oo shirarka loo baahan yahay ee BODka la qabto, isla markaana aan xogheynta oo kaliya oo dirin shirarka muhiimka ah.

Jawaab:- Xeerka dalladda wuxuu qorayaa 3 jeer sannadkii ayuu shiraa BODka, haddii la eedayahay aan shirno seddex ka badan waa wax kale, laakiin aniga waxaan isku dayayey inaan xeerka ixtiraamo, inta laga gaarayo kalfadhiga BOD ay sii shaqeeyaan Guddiga Fulinta iyo Xoghayntu.

-Xeerka wuxuu sheegayaa in la qaban karo shirar aan caadi ahayn markii emergency timaado, sidaa darteed, aan ku dhaqanno xeerka, proce-sesskana aan marinno markii loo baahdo shir aan caadi ahayn oo BODku yeesho.

Guddoomiyaha ayaa warbixiyey safar shaqo oo isaga iyo agaasimaha fulintu ay ku tageen Nairobi:

-Shaqaalihii waqtigu ka dhammaanayey waxa lagu ku guuleystay in waqtiga loo kordhiyo ilaa sanad dabe bilowgiisa. Waxaan soo jeedinnay in wax laga beddelo qaab-dhismeedka shaqaalaha gaar ahaan qeybo ka mid ah xogheynta, waana la aqbalay SW . Sidoo kale budget-ka aan heli doono sannadka oo dhan in na loo sii sheegi doona, hawlaha noo muhiimka ah ayaan kala xaajoon doonnaa SW .

- dhaliilaha khuseeya warbixinta waxqabadka aan la sugno marka la akhiriyo, waxaana soo jeediyey mudane Liibaan Bile Xiirey - Guddoomiye ku xigeenka inuu bilaabo.

Ugu dambehyntii, Falanqeyn kaddib waxaa la go'aamiyey:

1. In lagu dhaqmo Xeerka Dalladda - "shirarka caadiga ah iyo kuwa aan caadiga aheynba. (shir aan caadi ahayn waxaa isugu yeeri kara Guddoomiyaha isagoo la tashanaya Guddoomiye ku xigeenka, sidoo kale waxaa codsan kara seddex meelood (1/3) meel xubnaha BODka)".

Ajendaha 3aad:

"Soo jeedinta Guddiga Fulinta ee ku saabsan xoojinta xiriirka Dalladda iyo Xubnaheeda"

Guddoomiyaha ayaa faahfaahin ka bixiyey in loo baahan yahay in BODku go'aan ka gaaro seddex qodob oo ku saabsan kor u qaadidda iyo xoojinta xiriirka u dhaxeeya Dalladda iyo Xubnaheeda, waxayna kala yihiin:

a) In Kulammada Golaha Guud (General Assembly) ee Dalladda laga dhigo meerto hadba gobol ka mid ah gobollada Dalladda(**marka ay suurtgal tahay)**lagu qabto hadba intii suurtaggal ah.

b) In hawlaha (shirarka, wadatashiyada) kala duduwan ee Dalladda lagu qabto marba xarun ka mid ah xarumaha hay'adaha xubnaha ka ah SOSCENSA.

c) Ururrada xubnaha ka ah dalladda mid kasta loo texgeliyo hawlaha ay sida gaarka ah ugu xilsaaran yihiin, waxbarashada, caafimaadka, xuquuqul insaanka, ganacsiga, saxaafadda, biyaha iwm.

Qodobkan si qotodheer ayaa xubnuhu uga doodeen, iyadoo doodahoodu ka mid ahaayeen:

- In ay fiican tahay in shirarka lagu qabto xarumaha hay'adaha xubnaha ka ah SOSCENSA, hase yeeshee waxaa loo baahan yahay in laga digtoonaado in ajendaha laga baxo, laguna ekaado ujeeddada iyo ajendaha loo qorsheeyey.

- Waa hawl muhiim ah waxna ka taraysa sii xoojinta wada xiriirka iyo wada shaqeynta xarunta dhexe ee dalladda iyo dhammaan dalladaha xubnaha ka ah, waase in loo sameeyo qorshe nidaamsan oo hadba hay'adda lagu shiraryo xarunteeda sii ogaato waqti ku filan.

Intaas kaddib, waxaa la go'aamiyey: - In Seddexda qodob ee kor ku xusan sidooda loo qaato, iyadoo talooyinka BODkana la tixgelinayo.

Maalinta 2aad: (04/06/2013)

Ajendaha 4aad:

Maalinta 2aad: "Wabixinta Maaliyadda Dalladda"

Warbixinta oo nuqulkeeda maalintii hore loo qeybiyey xubnaha BODka, waxaa soo jeediyey Mudane Maxamuud Buulle Maxamed - Madaxda Maaliyadda ee SOSCENSA.

Waxaa xubnaha BODka ee shirka fadhiyey loo faahfaahiyey in dalladdu leedahay xisaab banki kala ah:

a. Xisaabta Operation-ka + BOD expenses.

b. Xisaabta Activities-ka

c. Xisaabta Keydka oo u gaar ah dalladda, BODkuna maamulo.

- Dakhliga kaliya ee soo gala dalladda waa lacagaha naga soo gaara EC-da oo noo soo marisa hay'adda Saferworld.

- Kharashyada ku baxa hawlaha SOSCENSA waxay u kala baxaan hawl-socodsiinta (operation-ka) oo ah kharashka caadiga ah ee Xafiiska, shaqaalaha iyo kirada guriga iyo baabuurka. Kharashka hawlaha kale ee Dalladdu qabato (Activity)ga, shirarka, kulammada wadaxaajoodyada iyo safarrada.

Su'aalo iyo caddeym ayaa la weydiiyey Madaxda Maaliyadda, si wanaagsan ayuuna uga jawaabey, kaddibna waxaa xubnuhu galeen doodo ku saabsan; kharashyada ku baxa iyo hawlaha la qabto inay kala badan yihiin oo kharashku uu badan yahay.

Xisaabta Keydka:

Waxaa dood kulul xubnuhu ka yeesheen, sida loo isticmaalayo iyo cidda awoodda u leh bixinta lacagta kaydka ah ee SOSCENSA u taalla.

- Su'aalaha muhiimka ah waxaa ka mid ahaa: Xeer ma ka yaalla sida loo maamulayo lacagta keydka ah ee dalladda?

-Jawaabta su'aashaasna waxaa bixiyey Xoghayaha Maaliyadda ee BODka mudane ABBOW oo yiri waxaa bixiya Guddiga Agaasinka marka uu u arko baahi muhiim ah, laakiin xeer u degsan ma jiro, marka laga reebo lacag gaaraysa ilaa $ 500 waxaa awood u leh Guddoomiyaha inuu bixiyo, qodobkaasna wuxuu ku yaallaa Buugga maaliyadda (Financial Manual)ka dalladda).

- Looma baahma xeer ama go'aan, maadaama BODka oo kaliya awood u leeyahay, iyo waa loo baahan yahay xeer iyo caddad laysku ogyahay in la bixiyo markiiba, ayaa doodda ka mid ahayd.

- Run ahaantii SOSCENSA way ku ammanan tahay inay keyd yeelato marka loo eego hay'ado badan oo ka dakhli badan haddana aan kayd laheyn, taas waxay muujinaysaa dadaal dheeraad ah oo loo galay sidii taasi ku suurtageli lahayd.

Dhigaal Sannadeedka Xubnaha

Waxaa aad looga dooday dhigaalka xubinnimada dalladda oo tirada si wanaagsan u bixiyey ilaa hadd ay yihiin oo kaliya 8 xubnood, qaar aan weligood bixin jiraan, qaar kalena qeybo ka mid ah bixiyeen, isku darkooduna yahay 52 dalladood, waana arrin aad loola yaabo, maxaa yeelay waxaa lays weydiiyey maxaa ugu wacan bixin la'aanta. Ma lacagtaa fara badan, miyaan la waydiin, miyey diidan yihiin mise way hilmaansan yihiin xubnaha aan bixin.

Si wax looga qabto, waxaa la soo jeediyey su'aal ahayd, maxaa xeer ah oo ka yaalla xubintii bixin weyda dhigaal sannadeedka xubinnimada?

Guddoomiyaha oo ka jawaabeyey su'shaas wuxuu yiri: Xeerka dalladda kuma qorna waxa laga yeelayo xubintii bixin weyda dhigaalka, hase yeeshee waxaa jira qodob ka hadalaya waajibaadka xubinta.

- Dhigaal bixin la'aanta yaan xubnaha looga saarin dalladda, waayoo in xubnaha laysku hayo ayaa ka muhiimsan.

- Xagga niyadda iyo wax wadaagidda waa waajib weyn in la bixiyo dhigaalka si xubintu u yeelato xushmad iyo texgelin, caddaaladdana loo dhowro, waayoo in qaar bixiyaan qaarna bixin sinnaan la'aan baa ka muuqanaysa.

Badnaanta kharashyada:

waxaa doodda ka mid ahaa in kharash badni ku baxo hawlaha dalladda, doodduna waxay u dhacaysay in loo baahan yahay in kharashyada intii la kari karo la dhimo, maadaama aanan lahayn deeq bixiye-yaal badan howlo fara badanna na horyaallaan. Waxaa laga soo jeediyey shirka in loo baahan yahay shirarka BODka lagu qabto Xarunta SOSCENSA si loo dhimo kharashka ku baxaya huteellada.

BOD Expenses:

Waxaa jira kharash bileed yar oo loogu tala galay in lagu bixiyo kharashyada BODka, hase yeeshee isticmaalka lacagtaas waxaa ka jira muranno, Guddoomiyaha oo mowduucaas ka hadlay wuxuu sheegay in kharashkaas sida loo maamulo ay cabasho ka jirto, sidaa darteedna uu hakiyey bixinta lacagtaas, haddana loo baahan yahay in BODku go'aan ka gaaro maadaama uu u fadhiyo shirkiisii 4 biloodla ahaa.

- Abbow - Xoghayaha Maaliyadda Guddiga Agaasinka, ayaa sheegay in arrintan ay hore BODku go'aan uga gaareen, waxaana la qoondeeyey $ 30 qofkiiba in la siiyo xubnaha BODka marka ay shir ama hawl kale isugu yimaadaan.

- Arrintan maadaama ay go'aan BOD ahayd, ma ahayn in la joojiyo waxay ka mid ahayd doodda qodobkaas.

- Maadaama cabashooyin iyo shaki soo baxay, waxaa habboon in Guddiga Agaasinka oo isku dhan go'aan ka gaaro, waana sababtaas tan uu u hakiyey Guddoomiyaha ayaa yiri.

Ugu dambeyntii dhammaan qodobbada kor ku xusan ee ku saabsan maaliyadda, gaar ahaan isticmaalka lacagta keydka, BOD Expenseska waxaa laga gaaray go'aammada hoos ku qoran:

1. Si loo yareeyo kharashyada ku baxa shirka BODka, waxaa la go'aamiyey in hadda kaddib lagu qabto xarunta SOSCENSA, iyadoo dhinaca logistikada iyo ammaankana si gaar ah Xogheynta looga dalbay inay xoojiso.

2. Muddada kalfadhiyada u dhaxaysa Lacagta Keydka ah waxaa laga isticmaali karaa $ 1,000.00 iyadoo aan waxba laga beddeleynin sida ku qoran nidaamkii maamliyadda Dalladda waxana lagu saleynayaa:

    a. Badbaadin naf, maal iyo sharafta Shacbiga Soomaaliyeed.
    b. Howl Deg-deg ah oo muhiim ah.
    c. Warbixinteedana la keeno kalfadhiga BODka ee xiga.

3. In Qorshe hawleed loo sameeyo lacagta BOD Expenses-ka, waxaana rasmi ah in lacagtaas lagu bixin karo oo kaliya hawl BODku qabanayo.

4. In la sii wado weydiinta xubnaha bixinta dhigaal sannadeedka. Qorshe cadna loo sameeyo kaddib markii la dhammeeyo hawsha Remmapping-ka xubnaha dalladda SOSCENSA oo dhowaan la fulin doono.

Guddoomiyaha dalladu wuxuu u soo bandhigay shirka arrin ku saabsan kharaj safareed, taasoo ahayd arrin hore dhwor jeer laysku qabsadey, hase yeeshee aan go'aan cad laga gaarin, haddase ay daruuri tahay in BODku go'aan ka gaaro:

"Waxaa jira xubno ka tirsan BODka oo ku magacaaban gobollada, hase yeeshee jooga Muqdisho, haddana markay shir ka soo qeyb galaan qaata lacagta safar(sidii iyagoo ka yimid gobol), taasoo maamul ahaan laga habboon yahay, nidaam xisaabeedkuna oggoleyn, sidaa darteed, waxaan soo jeedinayaa go'aan in laga qaato maanta.

Dood dheer kadib waxa loo qaaday COD iyadoo ay shirka fadhiday 15 xubnood:

- In la Joojiyo waxaa u codeysay 9 Xubnood

- In la sii wado waxaa u codeysay 5 Xubnood

- Waxaa ka aamusay 1 xubin

Go'aan:

a) IN LA JOOJIYO BIXINTA LACAGTAAS iyadoo laga bilaabayo Kalfadhiga 3aad ee BODka oo ku beegan Octoober 2013.

Waxaa kaloo la go'aamiyey, haddii ay duruufi la soo gudboonaato xubnaha gobollada qaar, waqtiga la qabanayo kalfadhiga in laga caawiyo xubnahaas khasanadda KEYDKA SOSCENSA.

Ajendaha 5aad:

”Warbixinta Wakiillada Gobollada"

Wakiillada gobollada waxay ka warbixiyeen xaaladda guud ee gobollada ay ka yimaadeen, gaa ahaan arrimaha nabadgelyada, caafimaadka, waxbarashada, waxaana mid kasta oo ka mid ah hadalka la siiyey 5 daqiiqo.

1.- Nuuro Faarax: - Wakiilka Gobolka Mudug

"Dalladda Ganacsatada Haweenka ee Horseed oo ka tirsan SOSCENSA, waxay hawlo muhiim ah oo ku saabsan wax u qabashada haweenka taagta daran u abaabuleen barnaamijyo wax ku ool ah oo noloshadooda wax ka taraya, waxaana ka mid ah, barnaamij lacag 1,000,000 Shilin Soomaali ah oo qeybiyey 30 haween, waxaa loogu tala galay inay ku shaqeystaan lacagtaan soona celiyaan muddo kaddib"

"Dalladdeenna, waxay si joogto ah uga qeyb qaadataa kor u qaadidda wacyiga bulshada gaar ahaan daryeelka degaanka iyo in aan dhirta la jarin darteed, waayoo nabaadguurka oo saameynaya noloshada dhammaan bulshada miyi iyo magaalaba ayaa ka daran faa'iida yar ee ay dadka dhuxusha ka ganacsadaa ka raadsadaan.

"Dhinaca Nabadgelyada gobolka way wanaagsan tahay marka laga reebo dagaallo qabiil oo hadba ka dhaca degaannada, taasna waxaan ka qeyb qaadannaa dadaallada dib u heshiisiinta ah.

2.- Cabdullaahi Xaashi - Gobolka Jubbada Hoose.

Gobolka Jubbada hoose wuxuu ka kooban yahay Shan degmo:- Kismaayo waxaa haysta dawladda, Jammaame - Shabaab, Afmadow - Dawladda iyo Shabaab - Badhaadhe - Shabaab

"Nabadgelyadu waa iska nasiib, waayoo magaalada Kismaayo waxaa joogaa ciidammo fara badan oo hubeysan cidna aan ka amar qaadan, kuwa Amisom iyo kuwo taabacsan Axmed Madobe. Isku dhacyo badan ayaa ka dhaca gudaha magaalada iyo daafaha marka ay soo weeraraan shabaab".

"Dhinaca nolosha dadka, waxaa ka da'ay Kismaayo roobab xoog leh ".

"Caafimaadku waa liitaa, waxaa ka gobolka ka jira shuban dad badan waxyeello u geystay gaar ahaan ca

ruurta iyo haweenka, cusbitaalloo waaweyn oo badan ma leh, inkastoo dawooyin fara badan ay soo gaarsiiso hay'adda ICRC".

"Dhinaca joojinta dhuxusha, inkastoo jiray isku day dhinaca dowladda iyo UNka ah, haddana arrintaas waa lagu guuldarreystay".

"Dhinca Siyaasadda iyo Shirkii Kismaayo, waxaa ka jira Gobolka is-maandhaaf weyn. Shirka markii horeba dawladda federaalka raalli kama ahayn, wuxuu ku furmay si aan la isku raacsaneyn fashil buuna ku dhammaadey. Waxaa jira 6 Madaxweyne, kuwaasoo mid kastana sheeganayo inuu yahay kii sharciga ahaa, laakiin awood ciidan waxaa ku leh Axmed Madoobe, iyo Dawladda Kenya. Wafdi IGAD ka socda oo xaqiiqo raadin ah ayaa yimid Kismaayo, Axmed Madoobe ayaa la kulmay, wafdigu waxay codsadeen ururrada bulshada, laakiin axmed madoobe wuu diiday, inkastoo markii dambe ay si dirqi ah kula kulmeen, aniga waan ka mid ahaa dadkii la kulmay wafdigii IGAD, runta ayaan u sheegnay iyo waxa dhabta ah ee meeshss ka jira, waxaanna u xaqiijinnay in wax meesha ka dhacay aysan ahayn doorasho sax ah".

"Dhinaca gargaarka aadannimo, waxaa Gobolka ka jira hawlo wanaagsan oo quudin ah, waxaana hawlahaas wada WFP, sidoo kale howlo dhinaca sanitation-ka ahna waxaa wada ICRC iyo 5 NGO oo maxalli ah.

3.- Mulki Abshow - Gobolka Hiiraan:

"Gobolka wuxuu ka kooban yahay 5 degmo, 1 degmo waxaa haysta dawladda, 3 degmona waxaa haysta Shabaab, halka 1 demo ay ka taliyaan Ahlu-sunnah Waljamaaca. Nabadgelyadu way fiican tahay, waxaana gacanta ku haya AMISOM Jabuuti, aad baana loogu diirsadey nabadgelyada oo 60% waa laysku halleyn karaa, laakiin waxay ku eg yihiin magaalada Beledweyne oo kaliya.

"Caafimaadka waa fiican yahay, cudurro waa jiraan, laakiin waxaa ka shaqeeya hay'ado caalami ah iyo kuwo maxalli ahba waxaana ka mid ah kuwo ka tirsan dalladda SOSCENSA. Ganacsiga aad buu u fiican yahay".

4. Cumar Xasan Isaaq Black -Gobolka Bay: -

"Gobolku wuxuu ka kooban yahay 6 degmo. 4 Dawladdaa ka talisa 2bana Shabaab. Nabadgelyo waa jirtaa laakiin ma ahan mid laysku halleyn karo. Waxaa jooga ciidammo fara badan oo AMISOM iyo Itoobiya ka tirsan, kuwa dawladda, dhowanna waxaa loo sameeyey ciidammo madani ah, kuwaas ayaadna moodda in ay wax ka beddeleen ammaanka degaannada. Roobab badan ayaa ka da'ay gobolka beerihiinna waa baxeen laakiin cudur ayaa galay dalaggii. Ganacsiga waa socdaa gaar ahaan xoolaha, hase yeeshee dhibaato badan ayey ku qabaan ganacsatadu, waayoo dawladdu waxay ka qaadeysaa canshuur, sidoo kale Shabaabna wuxuu ka qaadayaa canshuur xad-dhaaf ah marka ay marayaan waddooyinka meelaha ay shabaabku ka taliyaan, ciddii diiddana waa la dialayaa. Caafimaadka waa iska caadi, cusbitaal weyn ayaa ku yaalla Baydhabo, ma jirto hay'ad weyn oo gacan siisa, haddana ganacsatada iyo odoyaasha ayaa la tacaala oo waa cusbitaalka waa shaqeeyaa".

5. Luul Isaaq - Gobolka Bakool:

"Gobolkau wuxuu ka kooban yahay 6 degmo, hal kaliya ayaa dawladdu ka talisaa, inta kale waxaa ka taliya Shabaab. Dhibaatooyin xoog leh ayaa haysta shacbiga gobolka, gaar ahaan kuwii ka barakacay Xuddur, waayoo si kedis ah ayaa waxaa uga baxay ciidankii dawladda iyo Itoobiya, shabaab ayaana si deg-deg ah u qabsadey.Dadka waxaa haysata dhibaato dhinaca bani'aadannimada. Guud ahaan gobolka nabadgelyo ma jirto, waxbarasho iyo caafimaadna warkooda iska daa. Haddaba, Madaxda iyo Masuuliyiinta SOSCENSA ee halkan ku shirsan waxaan ka codsanayaa in loo qaylodhaamiyo dadkaas Soomaaliyeed ee dhibaataysan cid kasta oo gacan ka gaysan karta wax u qabashadooda, dawladda ama beesha caalamka".

6. Dhoof Ducaale - Gobolka J/dhexe:

"Dhammaan degmooyinka uu ka kooban yahay gobolka waxaa gacanta ku haya Shabaab, nabadgelyo ayaa ka jirta degaannada, laakiin waa mid ku dhisan cabsi iyo argaggax. Roobab badan baa ka da'ay gobolka beerihiina way baxeen, laakiin canshuuro xad-dhaaf ah oo sakawaad ku magacaabeen Shabaabka ayaa ka jira. Hal hay'ad oo maxalli ah oo la yiraahdo JCC ayaa indhowaydba joogtay, iyadiina hadda alabaabbada loo laabay shaqaalihii ka joogayna waa la xirxiray". Caafimaad ma jiro, cidii caafimaad u aadeysa meel kalena waa in fasax soo qaadataa 20 cisho ka badann kama maqnaan kartid gobolka. Waxbarashada Shabaab ayaa maamula, manhajkooda ayaana lagu bixiyaa".

7. Cabdikarriim Aweys - Gobolka Sh/Hoose:

"Gobolka degmooyin badan ayaa dawladdii KMGka ahayd ee sheekh shariif ku kordhisay, hase yeeshee 8 degmo oo hore u ayaa jira kuwaasoo UNka iyo dawladda federaalkaba u diiwaangashan. Laba dhibaato ayaa haysta dadka gobolka ku nool. Tan koowaad waa dhibaatooyinka ka dhashay fatahaadda wabiga shabelle, beerihii way baaba'een, bakaarihiina biyo ayaa ka galay. Tan labaad waa dhinaca nabadgelyada, waxaa la yaab leh, in degannada gobolka 30% dadku ka barakeen markii ay shabaab haysteen, markkii ay dawladdu qabsatay dadkii way soo laabteen, laakiin mar kale ayay soo qaxeen 60% iyagoo ka soo baxsanaya ciidanka dawladda oo dhacaya iyo gaajo. Hay'ado dhowr ah ayaa ku laabtay gobolka markii dawladdu qabsatay waxaana ka mid ah: COSV, WFL iyo CEFA, iyagana waxba kama qaban karaan meelaha ay dawladdu ka taliso sababtoo ah, madaxda ay dawladdu u magacowday ayaa laaluush xad-dhaaf ah ka doonaya. Waxaa xusid mudan in hay'addeydu ka hirgelisay Cusbitaal Casri ah degaanka Shalambood, daawadiisii iyo qalabkiina waa u diyaar laakiin lama dhaqaajin karo culeyska kor ku xusan dartiis".

8. Daa'uud Mahdi - Gobolka Sh/dhexe:

"Dhibaatooyinka ugu waaweyn ee hadda gobolka ka jira waxaa ka mid ah: - Fatahaad, Daacuun, Cunto yari, Colaado qabiileed soo cusboonaadey iyo maamul xumo iyadoo Guddoomiyaha Gobolka iyo kan degmada Balcad is-xabbadeeyeen dad ku dhinteen".

"Hay'addeenna waxay nabadgelyo xumo iyo shabaab uga soo carareen degmooyinka ay ka mid yihiin: Cadale, Aadan-yabaal iyo Ruunnirgood.

9. Libaan Bile - Gobolka Galguduud:

" Gobolka Galguduud nabadgelyadiisa waa fiican tahay waxaana gacanta ku haya Ahlusunna iyo Dawladda, laba degmo oo shabaab haystyo maahane, xaaladdooda waxbarasho iyo caafimaadna way fiican tahay".

Dood Furan:

"Xoojinta iskaashiga xubnaha dalladda ee gobollada ku sugan iyo Guddiga Agaasinka"

- Qodobkan si wanaagsan ayaa looga dooday, waxaana ka mid ahaa doodda oo laba xubnood isku raaceen in gobollada ay hadda ku sugan yihiin min 3 dalladood oo ka wada tirsan SOSCENSA, qaarkoodna way iska warqabaan, hase yeeshee loo baahan yahay in la xoojiyo xiriirkooda iyo wadashaqeyntooda.

- Warbixinnada inay soo diraan waa muhiim, laakiin warbinnada waa inay xaqiiq ahaadaan oo nuxur lahaadaan.

- In Warbixinnada aysan ka hadlin oo ka kaliya xaaladda guud ee gobolka, balse ay xoogga saaraan xaaladaha iyo hawlaha NSA-yada ee gobollada, waayoo SOSCENSA waxay masuul ka tahay xaaladdaas waana in warbixinta ka dhex muuqataa dhammaan xaaladaha qeybaha NSA-yada sida Ururrada Bulshada, Ganacsatada iyo Xirfadleyda.

- Si warbixinnadu u noqdeen kuwo waxtar leh, waxaa habboon in Xogheyntu diyaariso foormaad lona diro gobollada warbixinnada laga doonayo gobollada, markii ay soo diraanna la falanqeeyo lagana soo saaro warbixin waxtar u leh bulshada iyo dhammaan NSA-yada.

- Waxaa jira hawlo muhiim ah oo ay qabteen hay'ado ka tirsan dalladda oo gobollada jooga, laakiin SOSCENSA kama warqabto warbixinnadeeda kama mid aha, sidaa darteed, waxaa fiican in warbixinnadaas oo dhan loo soo wada diro xarunta kaddibna inta la falanqeeyo laga soo saaro warbixin tayo leh.

- Maadaama aan dhageysnnay warbixinno tilmaamaya dhibaatooyin xanuun iyo tiiraanyo badan oo ay soo tabiyeen wakiilladeenna gobollada, waxaa habboon inaan war saxaafadeed ka soo saarno annagoo adeegsanayna warbixinta una gudbinno hay'adaha ku shaqada leh sida dawladda, beesha caalamka iyo dhammaan ummadda Soomaaliyeed cidii gacan ka geysan karta wax ka qabashada dhibaatooyinkaas.

Ugu dameyntii, waa la qaatay talada ah in war saxaafadeed laga soo saaro dhibaatooyinka gobollada ka jira ee isugu jira kuwo nabadgelyo iyo bani'aadannimo, waxaana la **go'aamiyey:**

- In marka kalfadhigu soo xirmo la soo saaro warsaxaafadeed kaas oo isla markaaba loo saaray guddi soo diyaariya.

Maalinta 3aad: (05/06/2013)

Ajendaha 6aad:

"Dejinta Qorshe hawleedka (Action Plan) Afarta bilood ee soo socota kaas oo ku salaysan go'aammadii Shirweynihii 3aad ee Dalladda (GA) Jan 2013"

- Waxaa ka soo qeyb galay 16 xubnood lo BODka ka tirsan.

- Aayado Qur'aan ah, wacdi kooban kadib, soo koobid hawlihii shalay, iyo faahfaahin hawsha maalinta ugu dambeysa ee kalfadhiga waxaa sidii caadada ahayd soo jeediyey Agaasimaha Fulinta.

Dejinta qorshe-hawleedka Guddiga Agaasinka muddada u dhaxaysa labada kalfadhi waxay ahayd ajendaha maalinta 3aad ee ugu dambeysa. Waa arrin aasaasi ah oo aad muhiim ugu ah hawl-socodsiinta Guddiga Fulinta iyo habsami u hawlgalka Xogheynta oo u xilsaaran hawl-maalmeedka Xafiiska iyo fulinta qorshaha hawleedyada uu soo saaray GA-ga iyo BODka intaba.

Qorshe-hawleedkan wuxuu ahaa mid muhimaddiisa gaarka ah leh aadna loo sugayay, waxaana lagu bilaabay ka hadalkiisa, faahfaahin uu ka bixiyey Agaasimaha Fulinta, dokumentiyada saldhigga u ah qorshe-hawleedyada ay ku shaqeyso SOSCENSA, isagoo sheegay in ay sal u yihiin dokumentiyada kala ah:

1. Go'aannada Golaha Guud (General Assembly)
2. Go'aannada BODka (Board of Directors)
3. Qorshaha ay si wadajir ah u wada sameeyaan Xogheynta iyo Saferworld (Logical Frame-work)

Si hawsha u fududaato, waxaa loo saaray Afar Xubnood oo ka tirsan BODka iyo Agaasimaha, kaddibna waxay shirka dib ugu soo celiyeen qorshe-hawleed kaasoo kaddib qodob looga dooday loona ansixiyey isagoo dhammaystiranna ka eeg (Lixaaqa 1aad) oo ku xiran warbixintan.

Ajendaha 7aad:

"Wixii kale ee loo arko muhiim (Any other Business)"

Waxaa jiray qodob la soo jeediyey in lagu kordhiyo ajendihii Kalfadhiga kaasoo ah: **"Federalism"** Mowduucan oo loo arkay xasaasi, xubnuhu waxay soo jeediyeen in la siiyo 30 daqiiqo, waxaana dooddu u dhacday:

- Mowduucan waa xasaasi, dadweynahana muran badan ayaa ka taagan tan iyo maalintii la yiri ha lagu qoro distuurka, ilaa haddana way taagan tahay dooddadaas,marka waa inay SOSCENSA abaabusho la tashiyo bulshada si loo helo talooyin guud.

- Waxaa habboon in SOSCENSA ka tagto Muqdisho oo gobollada ugu tagto bulshada, lagalana tashado sida ay u arkaan Feredaralism, kaddibna natiijada gobollada oo dhan laga soo ururiyey loo gudbiyo dawladda ama la isu keeno dad metalaya, kaddibna wixii ay isku raacaan SOSCENSA u qareento una gudbiso cidii ku shaqo leh.

- Hadda xaaladda Kismaayo ka taagan, waxaa habboon in SOSCENSA ka qeyb qaadato sidii dhibaatada wax looga qaban lahaa, waayoo waxa laysku hayo waa federalism.

- Maamul Goboleed iyo Federalism yaan laysku qaldin, maamul goboleed waa loo baahan yahay waana dowladda cidda awoodda u leh inay samayso, laakiin federalism, wuxuu u baahan yahay imkaaniyaad badan oo lagu hirgeliyo wuxuuna qaadanayaa waqti.

- Federalism, waxaa jira caqabado badan oo hor-taagan, waxaana ka mid ah:
    a. Sharci la'aan (Sharicigii lagu dhaqmi lahaa weli lama soo saarin)
    b. Dib u heshiisin dhab ah lama samaynin.
    c. Qeybo dalka ka tirsan oo mucaaradku ka taliyo
    d. Dhaqaale la'aan
    e. Faragelin shisheeye oo aan meesha ka marneyn.

Dooddaas waxa lagu soo koobay:

a) In dadka weydiinno waxa ka qabaan federalism hadba meeshii suurtagal ah gobollada iyo degaannada oo dhan.
b) In SOCENSA ay gacan iyo talo ka siiso dawladda, wixii ay ku saxan tahay ku taageerto, wixii aysan ku saxneynna kala taliso.
c) Intaas wixii ka badan, Istiraatiijiyadda u qareemidda ee ayaa SOSCENSA oo ka hadlaysa Distuurka iyo arrimahiisa ayaa kaga shaqeyn doontaa.

Qiimeynta Kalfadhiga

Guddoomiyaha SOSCENSA, wuxuu ugu dambeyntii hor dhigay dhammaan xubnaha shirka ka soo qeyb galay, maxay ku qiimeyn lahaayeen kalfadhiga:

- Shirku wuu fiicnaa, laakiin hab qoraalka warbixinta waxqabadka waxaan soo jeedin lahaa in wax laga beddelo oo laga dhigo wax af-ka qalaad lagu yiraahdo (Result Oriented), halka ay hadda ka tahay (Activity Oriented) oo loola jeedo in loo baahan yahay in activity kasta natiijadiisa la sheego in la gaaray, aan la gaarin, loo dhowaadey, si loo diyaariyo qorshihii hore loogu socon lahaa, waxa khaldamayna loo sixi lahaa.

- Shirku wuxuu fiicnaa, kasoo qeybgalkiisuna waa wacnaa, waxaase loo baahan yahay in XOGHEYNTA gacan lagu siiyo hawlaha ay hayso, warbixinnada iyo macluumaadka ay weydiistaanna la siiyo mar kasta oo ay soo weydiistaan.

- Waqtiga doodda waa gaabnaa, waxaana hadlay oo kaliya dad yar, waxaa qabay mid ka mid ka qeybgalayaasha.

Gebagebadii Kalfadhiga

Guddoomiyaha Dalladda SOSCENSA wuxuu si rasmi ah u ugu dhawaaqay inuu xiran yahay Kalfadhigii 2aad ee BODka, wuxuuna xubnaha u rajeeyey safar wanaagsan iyo soo noqod nabdoon xubnaha u baxaya gobollada, kuwa Muqdishana wuxu u rajaynaynaa nabad iyocaafimaad qab.

Shir Saxaafadeedkii SOSCENSA

Sida ku xusan warbixinta, kaddib markii la dhegeystay warbixinnada wakiillada gobollada, dhibaatooyin fara badan oo dhinac nabadgelyo iyo bani'aadannimada taabanaya oo ay soo jeediyeen, waxaa Kalfadhigu go'aansadey in SOSCENSA baaq ka soo saarto, waxaana soo diyaarinta Baaqa loo xilsaaray guddi ka kooban:

1. Cabdullaahi Maxamed BLack
2. Daa'uud Nuur Mahdi
3. Luul Isaaq
4. Cabdullaahi Xaashi Xasan
5. Cabdikariim Aweys Abbow

Sidaa darteed, markii la xiray Kalfadhiga, kaddib waxaa saxaafadda la hadlay Guddoomiyaha oo baaq ka kooban 7 qodob oo ku saabsan sida loogu baahan yahay in deg deg wax laga qabto dhibaatooyinka haysta shacbiga Soomaaliyeed ee gobollada ku nool, wuxuuna baaqa u jeediyey dawladda, ummadda Soomaaliyeed gudaha iyo dibadda iyo beesha caalamka in gargaar bani'aadannimo lala gaaro. Baaqa oo dhammeystiran fadlan ka eeg lifaaqa 4aad ee warbixintan

<u>Lifaaqyada ku xiran warbixintan:</u>

1. *Qorshe-hawleedka BODka ee 4ta bilood ee socota June, July, August and October 2013.*
2. *Magacyada Xubnaha ka qeyb galay Kalfadhiga 2aad ee SOSCENSA.*
3. *Ajendahii/jadwalkii Kalfadhiga ee 3da Maalood socday 3 - 5 June 2013.*
4. *Baaqa Kalfadhiga Labaad ee Xubnaha Guddiga Agaasinka 2013.*